IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Moqdisho, 13 Seb. 1975. | L. 1 R. 9

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

---

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SAHRCI L. 51 ee 30 Agoosto 1975, — *Sharci la Xiriira Dacwadaha ay dhinac ka tahay Dowladda iyo Laameheeda.* *Bog. 604*

SHARCI L. 52 ee 23 Agoosto 1975, — *Isbeddelkii 2aad ee Miisaaniyadda.* » *606*

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 2 Luuliyo 1975, L. 128 — *Dallacaad* » *609*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 17 Luuliyo 1975, L. 129 — *Shaqo ka nasasho Xiddigle Ibraahim Cabdi Bile* » *610*

---

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 20 Agoosto 1975, L. 130 — *Billad Dahab ah ee hawlkarnimo ee lagu maamuusay Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.* » 611

*2. Wasaaradda Gaanshaandhigga ee Midowga Soofiyeeti*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 20 Agoosto 1975, L. 131 — *BilladQalin ah ee Hawlkarnimi ee lagu maamuusay Borisov Grigor,i Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Hawlaha Guud, Gobolka Togdheer, Gobolka Galguduud* » 612

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 20 Agoosto 1975, L. 132 — *Billado Maar ah oo lagu maamuusay 22 Hay'adood.* » 613

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Luuliyo 1975, L. 133 — *Shaqo ka saarid Xiddigle Cismaan Nuur Xuseen.* » 614

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6. 9.75, L. 183 *Lumid Jeeg Lamb. 9613 — Shs. 8.000 u leyahay Jaalle Muunye Mayaani Muunye.* » 615

**SHARCI L.51 30 Agoosto 1975.**
**Sharci la xiriira dacwadaha ay dhinac ka tahay Dowladda iyo laamaheeda.**

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.

ASAGOO ARKAY Sharciga lam. 14 taariikhda 4 Febaraayo 1975 oo ku saabsanaa Dacwadaha Dowladdu dhinac ka tahay oo loo wareejiyay Maxkamadda Badbaadada Dalka.

ASAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dowladda.

WUXUU SOO SAARAY

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1

Maxkamadaha Badbaadada Dalka iyo laameheeda ee Gobollada waxaa laga dhisay «QAYB MADANI AH» oo awoodeedu tahay inay gasho Dacwadaha madani (cause civile) ee dhinac ka tahay Dowladda, Wakaaladaha Dowladda ee madax bannaan, Bangiyada, Dowladaha Hoose, Mashruucyada iyo Shirkadaha ay Dowladdu ama Wakaaladeheedu qayb ku leeyihiin.

Qod. 2

Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Muqdisho waxaa laga dhisay «QAYB IDAARI AH» (sezione Amministrativo)ee awoodeedu tahay inay gasho Dacwadaha Idaariga ah (Cause Amministrative).

Qod. 3

Qaadidda dacwadahaas waxaa lagu habaynayaa Sharciyada khuseeya arrinta ay ku saabsan tahay dacwaddu iyadoo mar waliba la dhowri doono nidaamka hoos ku qoran:

b. Dacwadaha cusub am akuwa hadda ka hor laga furay Maxkamadaha darajada Koowaad ee caadiga ah ee aan weli Xukun laga gaarin marka la qaadaayo waxaa la raaci doonaa habka ay Maxkamadaha darajada Koowaad u qaadaan dacwadaha Madaniga ah ama ay u qaaddo Maxkamadda Sare Dacwadaha Idaariga ah.

t. Dacwadaha Madaniga ah ee hor yaalley Maxkamadaha Rafcaanka ama Maxkamadda Sare marka la qaadayo waxaa la raaci doonaa habka u dhigan.

Qod. 4

Dacwadaha cusub ee laga hor oogo Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laameheeda waxaa dul saaran Ajuuro la mid ah tan laga bixiyo Maxkamadaha Caadiga ah ee darajada Koowaad haddii dacwaddu ay tahay mid Madani ah ama Ajuurada ay qaaddo Maxkamadda Sare haddii dacwaddu tahay mid Idaari ah.

Qod. 5

Xukunnada ah Idaariga iyo Madaniga ee Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laameheedu soo saaraan waxay yihiin kuwo dhammaad ah (definitivo) oo aan Racfaan laga qaadan karin, haddii laga reebo cabashada lagu xusay Sharciga tirsigiisu yahay 38 taariikhdiisuna tahay 5 Abrile 1972.

Qod. 6

Tirada Garsoorayaasha qaadi doona dacwadaha Sharcigan **ku til**maaman, waxay la mid tahay tan qaybta **Ciqaabta (Sezione Penale).**

Qod. 7

1. Muddada u dhaxeeya 4ta Febaraayo 1975 ilaa maalinta Sharcigan lagu soo saari doono FAAFINTA RASMIGA AH EE DOWLADDA, wixii ku saabsan waqtiga dacwadaha Sharcigani tilmaamaayo la ictibaarinmayo oo waa la joojiyey (sospensione ed **interruzione normativa**).

2. Go'aannada ay soo saareen Maxkamadaha Caadiga ah muddada u dhexeysa waqtiga lagu tilmaamay xubinta 1aad ee qodobkan, ee ku saabsan dacwadaha Sharcigani sheegayo waa la baabi'iyey.

3. Mudda ku saabsan dacwad qaadista ee ku xusan Qod. 121 X.H.M. lagu dhaqmimaayo oo waxaa loo beddelay inay noqoto 10 Maalmood.

Qod. 8

Wax allaale wixii heshiis ah ee horya uga dhexeeyey Hay - adaha Sharcigan lagu tilmaamay iyo Qareennada iskood u shaqeysta, laguma dhaqmi karo oo waa la baabi'iyey.

Qod. 9

Sharci kasta oo aan la socon karin ama ka hor imaanaaya Sharcigan waa la baabi'iyey.

Qod. 10

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro FAAFINTA RASMIGA AH.

Muqdisho, 30/8/1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**SHARCI L.52 Tr. 23 Agoosto 1975.**

**Isbeddelkii 2aad ee Miisaaniyadda 1975.**

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Go'aankii labada gole ee 21/8/1975.

Qod 1aad

Isbeddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda 1975, sida ka muuqata lifaaqa A, waa la ogolaaday.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxu dhaqan - galayaa 23da Ogoost, 1975, wuuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda.

*(Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi)*

ISBEDDELKA 2AAD EE MIISAANIYADDA 1975. Lifaaq «A»

| MADAX | | MADAX | TILMAAN | QIYAASTII HORE | ISBEDDEL | QIYAASTA CUSUB |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.0. | Madaxtooyada G.S.K. | 1.2.3. (t) | Guryaha | 150.000 | + 250.000 | 400.000 |
| | | 1.2.6. (x) | Sahayda safarka dibedda | 1.400.000 | + 800.000 | 2.200.000 |
| | | 1.27. (b) | Nalka iyo biyaha | 203.000 | + 100.000 | 303.000 |
| | | 1.2.8. (d) | Kharashka martigelinta | 800.000 | + 200.000 | 1.000.000 |
| 2.0 | Wasaaradda Maaliyadda | 1.2.8. (d) | Kaalmada Keydka ah | 9.067.167 | + 1.520.000 | 10.587.167 |
| 5.1. | Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta (Maamulka) | 1.2.7. (b) | Nalka iyo biyaha | 50.000 | + 200.000 | 250.000 |
| 5.2. | Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta (Ciidanka Asluubta) | 1.2.1. (kh | Cuntada | 3.200.000 | — 4.000.000 | 3.600.000 |
| 6.1. | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Maamulka) | 1.2.8. (a) | Kharashka Xarumaha Dhallinta | 2.500.000 | + 1.000.000 | 3.500.000 |
| 6.2 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Ciidanka Booliiska) | 1.1.3. | Abaalgudyada | 11.385.613 | — 200.000 | 11.585.613 |
| 13.0 | Wasaaradda Gaadiidka | 1.2.1. (x) | Taargada baabuurta la iibsado | 400.000 | + 100.000 | 1.400.000 |
| 17.0 | Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta | 1.1.2. | Mush. Shaq. aan joogtada ahayn | 4.987.187 | + 1.500.000 | 6.487.187 |
| 19.0. | Wasaaradda Caafimaadka | 1.2.1. (kh | Daabacadda & alaabta xafiiska | 200.000 | + 1.000.000 | 300.000 |
| | | 1.2.2. (x) | Qalabka Isbitaalada | 600.000 | + 1.000.000 | 1.600.000 |
| | | 1.2.7. (a) | Boosha, dhamb. & telefoonada | 40.000 | + 30.000 | 70.000 |
| | | 1.2.7. (b) | Nalka iyo biyaha | 350.000 | + 350.000 | 700.000 |
| | | | Isugeyn | 35.332.967 | + 8.650.000 | 43.982.967 |

| MADAX | | TILMAAN | QIYAASTII HORE | ISBEDDELKA (—) | QIYAASTA CUSUB |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.10.0. Wasaaradda Xoolaha, dhirta iyo daaqa. Mashruuca 10aad | 2.2.0. (a) | Deeqda Wakaaladda Horumarinta Xoolaha | 10.000.000 | — 4.000.000 | 6.000.000 |
| 1.11.0. Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka badda. | 3.1.1. (t) | Dhismaha Secondo Liido | 200.000 | — 200.000 | |
| | 3.1.1. (j) | » Dugsiga Kalluunka | 250.000 | — 250.000 | |
| 1.12.0 Wasaaradda Warshadaha | 3.1.1. (a) | Warshadda Sibirka | 9.200.000 | — 2.000.000 | 7.200.000 |
| Wasaaradda Warshadaha | 3.1.1. (x) | Mashruuca safaynta saliidda | 3.000.000 | — 2.000.000 | 1.000.000 |
| 1.14.0. Wasaaradda Boostada iyo isgaarsiinta. | 2.2.0. (b) | Bankiga Boostada | 200.000 | + 200.000 | |
| | | Isugeyn | 22.850.000 | — 8.650.000 | 14.200.000 |

## XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

**Tr. 20 Agoosto 1975, L.130.**

**Billado Dahab ah ee Hawlakarnimo ee lagu maamuusay:**
**1. Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed**
**2. Wasaaradda Gaashaandhigga ee Midowga Soofiyeeti**

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee 18kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY Sida habsamida iyo hawlkarnimada dheeraadka ah leh ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo Kooxdii ka socotey Wasaaradda Gaashaandhigga ee Midowga Soofiyeeti ay u hirgeliyeen hawshii adkeyd ee gargaarka raridda dadkii Soomaaliyeed ee abaartu tabaaleysay, muddadii u dhexeysey (15 Juun - 15 Agoosto 1975, dhan kasta marka laga eegana, si daacadnimo aan xad lahayn iyo kalsami buuxda leh ku gutay xilkii ka saarraa hawshaas fulinteeda;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan in ay tahay xusuus lama ilaawaan ah in loo yeesho kaaliniit weyneyd ee ciidammadaas ay ka geysteen hawshii taariikhda qotada dheer lahayd ee daadgureynta iyo baaqii Kacaanka ee ahaa siku filnaashaha;

MARKUU DHEGEYSTEY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD SHARAF DAHAB AH EE HAWLKARNIMO Hay'adaha hoos ku qoran:

1. Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed
2. Wasaaradda Gaashaandhigga ee Midowga Soofiyeeti

Muqdisho, 20 Agoosto, 1975

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*(S.Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 20 Agootso, 1975, L.131**
**Billado Qalin ah ee Hawkarnimo ee lagu maamuusay:**
**1. Borisov Grigori, 2) Wasaaradda Arrimaha Gudaha, 3) Wasaaradda Hawlaha Guud, 4) Gobolka Togheer, 5) Gobolka Galguduud.**

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee 18kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY In hawsha, Hay'adaha iyo Kooxda qodobka hoose ku qoran, ay ka qabteen goobihii gargaarka raridda, muddadii ahayd labada bilood ee u dhexeysey (15 Juun - 15 Agoosto 1975) ay tahay hawl lagu fuliyey daacadnimo, xilkasnimo, hawlkarnimo iyo biseyl hantiwadaagnimo;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan in ay tahay xusuus gaar ah in loo yeesho kaalintii wacnayd ee Hay'adahaasi ay ka geysteen hawshii qiimaha lahayd ee gargaarka raridda dadkii Soomaaliyeed ee abaartu tabaaleysay;

MARKUU DHEGEYSTEY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodb Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD SHARAF QALIN AH E HAWLKARNIMO Hay'adaha hoos ku qoran:

1. Borisov Grigori Grigirievich
2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha
3. Wasaaradda Hawlaha Guud
4. Gobolka Togdheer
5. Gobolka Galguduud

Muqdisho, 20 Agoosto, 1975

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*(S.Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 20 Agoosto 1975, L.132**
**Billado Maar ah ee Hawlkarnimo oo lagu maamuusay 22 Hay'adood**

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee 18kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY Sida xilkasnimada iyo kartida leh ee Hay'adaha hoos lagu sheegi doono ay uga soo baxeen xilkii ka saarraa hawshii akday ee gargaarka raridda dadkii ay abaartu tabaaleysay, iyagoo si daacadnimo iyo hawlkarnimo aad u hufan leh ku fuliyey baaqi kacaanka ee ahaa isku filnaashaha iyo daryeelidda mabd'a bulshada ee hantiwadaagga ah;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan in ay tahay in si gaar ah loo maamuuso Hay'adaha qodobka hoose ku qoran ee kaalinta fiican ka geystey gargaarkii daadguraynta ee muddadiisu u dhexeysey (15 Juun - 15 Agoosto 1975);

MARKUU DHEGEYSTEY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD SHARAF MAAR AH EE HAWLKARNIMO Hay'adaha hoos ku qoran:

1. Kuluugvin Anatoly Mikhailovich
2. Shetina Pietr Savelevich
3. Balashiov Viacheslav Vasilievich
4. Savin Vladamir Vasiliyij
5. Wasaaradda Gaadiidka
6. Ciidanka Booliska Soomaaliyeed
7. Wakaaladda Batroolka Soomaaliyeed
8. Wasaaradda W. & H. Dadweynaha
9. Ciidanka Guulwadayaasha
10. Gobolka Nugaal

11. Gobolka Mudug
12. Gobolka Sanaag
13. Gobolka Bari
14. Gobolka Bakool
15. Degmada Burco
16. Degmada Ceeldheer
17. Degmada Buuhoodle
18. Degmada Laascaanood
19. Degmada Gaalkacyo
20. Degmada Caabuudwaaq
21. Degmada Garoowe
22. Degmada Qardho

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*(S.Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 6 Lulyo 1975, L.133**
**Shaqo ka saarid Xiddigle Cismaan Nuur Xuseen.**

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 19aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 2, taariikhdiisuna tahay 23.12.1972 ee dhismaha Ciidamada Booliiska,

ISAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidamada Booliska kuna soo sheegay warqaddiisi ku lambarsaneyd SEC/PE/169 ee 16/6/1975;

ISAGOO ARKAY Warqaddii Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka lambarkeeduna ahaa GSK.S.27.B.1-150, taariikh 5.7.1975 ee lagu ogolaaday in shaqada loogu saaro Xiddigle Cismaan Nuur Xuseen.

ISAGOO DHEGEYSTAY Ra'yigii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha kuna qornaa warqaddii lambarkeedu ahaa PS.S.1.230-416 ee 19/6/1975.

WUXUU AMRAY

Qod. 1aad

In Xiddigle Cismaan Nuur Xuseen shaqada laga saaro 5ta Luulyo 1975, asluub xumo awgeed.

**Qod. 2aad**

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu dhigidoonaa Faa-finta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6 Luulyo 1975.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*S Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee **Wasaaradda**
Arrimaha Gudaha
*Sax. S.Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Haddu Arakay dacwadda hor ku Qoran;

Markuu arkay waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiski Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed, Laanta 3aad, (eeg warq. Lamb. 1315); wuxuu ogaaday in Shaqadiisa tahay;
Haddu arkay Qod. 69 D.L. 9.9.65 n.2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda Jeegga lamb. 9613 kuna qornayd Shs. 8.000/= (sideed-kun/=) Tr.7.8.75;

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo jeeg cusub ninka la yiraadho Jaalle Muunye Mayaani, oo ah ninki iska lahaa Jeegga Wareega ee lumidiisa kor lagu soo cadeeyey ka dib marki 15 maalmood ka soo wareegato maalinta Dekreetadan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYA

In jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Muunye, ama qof isla asaga ka sita wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 15ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.
Xamar, Tr. 6.9.75

GARSOORAHA MAXKAMADDA
*Cabduraxmaan Sheekh Maxamed*

*(L.183)*